جمهورية مصر العربية                8 شعبان 1443هـ
وزارة الأوقاف                11 مارس 2022م

(1)

# Darajada shuhadada rabbigooda agtiisa u taalla

Mahad Allaa iska leh , Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:
{وَلا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللهِ أَمْوَاتًا بَلْ أَحْيَاء عِندَ رَبِّهِمْ يُرْزَقُونَ * فَرِحِينَ بِمَا آتَاهُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ وَيَسْتَبْشِرُونَ بِالَّذِينَ لَمْ يَلْحَقُوا بِهِمْ مِنْ خَلْفِهِمْ أَلَّا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ * يَسْتَبْشِرُونَ بِنِعْمَةٍ مِنَ اللهِ وَفَضْلٍ وَأَنَّ اللهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُؤْمِنِينَ}

**(Hana u malaynina kuwa lagu dilay jidka Alle kuwa dhintay, saas ma aha waxay ku noolyihiin rabbigooda agtiisa laguna arzaaqi * Iyagoo ku faraxsan wuxuu siiyay Alle oo fadligiisa ah, kuna bishaaraysan kuwaan wali haleelin ee gadaashooda ah inuusan korkooda cabsi iyo murugo midna «ahyn» * Waxayna ku Bishaaraystaan Nicmo Eebe iyo Fadli iyo inaan Eebe Dayacayn ajriga Mu'miniinta)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

intaas kaddib:

Shahaadada Alle (cazza wa jalla ) dartii waxay ka mid tahay darajooyinka ugu sarreeya, iyo waxyaalaha ugu waaweyn oo Alle loogu dhowaado, waa doorasho xagga Alle ka imaanayso uu dooranayo geesiyaal naftooda u huray inay xaqqa u gargaaraan oo ayna difaacaan, iyo inay jeclaadaan ilaalinta dalka iyo

amaanka dadkiisa iyo badbaadada dhulkiisa, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{وَلِيَعْلَمَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا وَيَتَّخِذَ مِنْكُمْ شُهَدَاءَ}.**

**(iyo in Eebe Muujiyo kuwa rumeeyay kana yeesho Xaggiinna Marag)**

Sidaa awgeed Alle (SW) wuxuu ku gaaryeelay shuhadada darajooyin sarsare iyo fadli weyn iyo karaamooyin fariid ah, ma jiro wax kaga daliil badan taas oraahda nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(وَالَّذِي نَفْسِي بِيَدِهِ لَوَدِدْتُ أَنِّي أُقْتَلُ فِي سَبِيلِ اللهِ ثُمَّ أُحْيَا، ثُمَّ أُقْتَلُ ثُمَّ أُحْيَا، ثُمَّ أُقْتَلُ ثُمَّ أُحْيَا، ثُمَّ أُقْتَلُ).**

**(Waxaan ku dhaartay Allaha naftayda ay gacantiisa ku jirto waxaan jeclaaan lahaa in Alle dartii lay dilo kadib lay soo nooleeyo, kadib lay dilo kadib lay soo nooleeyo, kadib lay dilo kadib lay soo nooleeyo)**

Darajada shuhadada waxaa ka mid ah: inay yihiin kuwa nool oo Alle agtiisa jooga, nolol aysan dadka ogaan karin, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَلا تَقُولُواْ لِمَنْ يُقْتَلُ فِي سَبيلِ اللهِ أَمْوَات بَلْ أَحْيَاء وَلَكِن لاَّ تَشْعُرُونَ}**

**(Hana ku dhihina kuwa lagu dilo jidka Alle (Jahaadka) waa dhinteen, saas ma aha ee waa nool yihiin, laakin ma dareemaysaan)**

Waxaa laga wariyay Jaabir bin Cabdillaahi -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri:

**(لَقِيَنِي رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ)، فَقَالَ لِي: (يَا جَابِرُ مَا لِي أَرَاكَ مُنْكَسِرًا)؟ قُلْتُ: يَا رَسُولَ اللَّهِ اسْتُشْهِدَ أَبِي، وَتَرَكَ عِيَالًا وَدَيْنًا، قَالَ: (أَفَلَا أُبَشِّرُكَ بِمَا لَقِيَ اللَّهُ بِهِ أَبَاكَ)؟ قَالَ: بَلَى يَا رَسُولَ اللَّهِ، قَالَ: (مَا كَلَّمَ اللَّهُ أَحَدًا قَطُّ إِلَّا مِنْ وَرَاءِ**

حِجَابٍ، وَأَحْيَا أَبَاكَ فَكَلَّمَهُ كِفَاحًا)– أي : من غير حجاب- فَقَالَ: (يَا عَبْدِي تَمَنَّ عَلَيَّ أُعْطِكَ)، قَالَ: يَا رَبِّ تُحْيِينِي فَأُقْتَلَ فِيكَ ثَانِيَةً، قَالَ الرَّبُّ (عَزَّ وَجَلَّ): (إِنَّهُ قَدْ سَبَقَ مِنِّي أَنَّهُمْ إِلَيْهَا لَا يُرْجَعُونَ)، قَالَ: وَأُنْزِلَتْ هَذِهِ الآيَةُ: {وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا بَلْ أَحْيَاءٌ عِنْدَ رَبِّهِمْ يُرْزَقُونَ})،

**(Waxaa ila kulmay rasuulka Alle - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu igu yiri: "Jaabirow maxaad u niyadjabsan tahay"? waxaan ku iri: rasuulkii allow, aabbahayga ayaa shahiiday wuxuuna ka tagay ciyaal iyo deyn, wuxuu yiri: "ma kugu bishaareeyaa wixii aabbahaaga kula kulmay Alle? wuxuu yiri: haa rasuulkii allow, wuxuu yiri: " Ilaahay waligii qof si toos ulama hadlin wuxuu soo nooleeyay aabbahaaga wuuna la hadlay iyagoon xijaab u dhexeynin, wuxuu ku yiri: addoonkeygiyow wax iga codso aan ku siiyee, wuxuu yiri: rabbiyow waad i noolaynaysaa mar labaad ayaana lay dilayaa Alle wuxuu yiri: waxaa iga hormaray inaan dad la celinaynin, wuxuu yiri aayaddaan ayaa lasoo dejiyay:**

{وَلَا تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أَمْوَاتًا}.

**(Hana u malaynina kuwa lagu dilay Jidka Alle kuwa dhintay)**

Sida ay ugu nool yihiin shuhadada Alle (caza wa jalla) agtiisa ayay ugu nool yihiin xusuusta dalka, lama illaawayo geesinimadooda xataa haddii waqti kasoo wareegto.

Waxaa ka mid ah : ruuxdooda in Alle (SW) agtiisa ay ku raaxaysanayso, jannada ay dhex daaqayso siday doonto wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(لَمَّا أُصِيبَ إِخْوَانُكُمْ بِأُحُدٍ، جَعَلَ اللَّهُ أَرْوَاحَهُمْ فِي جَوْفِ طَيْرٍ خُضْرٍ، تَرِدُ أَنْهَارَ الْجَنَّةِ، تَأْكُلُ مِنْ ثِمَارِهَا، وَتَأْوِي إِلَى قَنَادِيلَ مِنْ ذَهَبٍ مُعَلَّقَةٍ فِي ظِلِّ الْعَرْشِ).

(**Markii walaalihiina Uxud lagu asiibay, wuxuu geeyay Alle ruuxdooda shinbir cagaaran dhexdeeda webiga jannada ayay arooraysaa miraheeda ayayna ka cunaysaa, kaddib waxay hooyanaysaa feynuusyo dahab ah oo carshiga harkiisa suran**).

Waxaa ka mid ah: inay yihiin kuwa helaya ajir weyn iyo nuur dhammaystiran maalinta qiyaamaha, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَالشُّهَدَاءُ عِنْدَ رَبِّهِمْ لَهُمْ أَجْرُهُمْ وَنُورُهُمْ}،

**(Shuhadaduna Eebe agtiisa ajir iyo nuur bay ku leeyihiin),** wuxuu ku leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): Umu xaaritha bintu Suraaqa (Alle raalli haka noqdee) markay weyddiisay meeshuu ku dambeeyay Xaaritha (Alle raalli haka noqdee), maalita Badar ayuu shahiiday:

(يَا أُمَّ حَارِثَةَ، إِنَّهَا جِنَانٌ فِي الْجَنَّةِ، وَإِنَّ ابْنَكِ أَصَابَ الْفِرْدَوْسَ الْأَعْلَى).

**(Umu xaarithoy waa jannooyin jannada ku dhex yaalla wiilkaagana wuxuu helay fardowsada ugu sarraysa)**

Waxaa ka mid ah: inay u shafeecaan ehelkooda maalinta qiyaamaha, waana abaal xagga Alle (cazza wa jalla) ka yimid oo ku salaysan barbaarintooda wanaagsan iyo diyaarintooda, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(يَشْفَعُ الشَّهِيدُ فِي سَبْعِينَ مِنْ أَهْلِ بَيْتِهِ).

**(shahiidka wuxuu u shafeecaa toddobaatan ehelkiisa ka mid ah)**

Waxaa ka mid ah: in ajirka camalkooda go'aynin, waa loo dhammaystirayaa waana loo laballaabayaa, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**كُلُّ مَيِّتٍ يُخْتَمُ عَلَى عَمَلِهِ إِلاَّ الَّذِي مَاتَ مُرَابِطًا فِي سَبِيلِ اللهِ فَإِنَّهُ يُنْمَى لَهُ عَمَلُهُ إِلَى يَوْمِ القِيَامَةِ، وَيَأْمَنُ مِنْ فِتْنَةِ القَبْرِ).**

**(Meyd kaste camalkiisa waa la khatimayaa kan dhintay asoo heegan dar Alle ugu jiro mooyee, waxaa loo kobcinayaa camalkiisa ilaa maalinta qiyaame, wuxuuna ka nabadgalayaa fidnada qabriga)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato midka lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Shaki kama taagna in darajada shuhadada oo uu mudanayo shahiidka dhabta ah oo xaqqa gartay oona daacad u noqday oo difaacay oo dartiisa nafta u huray, shahiidka xaqqa ah waa qof u dhintay asoo difaacaya dhulkiisa iyo sharaftiisa iyo dalkiisa iyo amaanka ehelkiisa, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَنْ قُتِلَ دُونَ مَالِهِ فَهُوَ شَهِيدٌ، وَمَنْ قُتِلَ دُونَ أَهْلِهِ، أَوْ دُونَ دَمِهِ، أَوْ دُونَ دِينِهِ فَهُوَ شَهِيدٌ).**

**(Qofkii la dilo hantidiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo ehelkiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo dhiiggiisa ka soke waa shahiid, qofkii la dilo diintiisa ka soke waa shahiid,)**

Si kastaba ha ahaatee, waxaan cadeyneynaa in daacadnimada nafta shuhadadeenu ay nooga baahan tahay inaan ciidan u noqono qarankan weyn, mid walbana goobtiisa, iyo in qof kasta oo inaga mid ahi uu aad ugu dadaalo adeeggiisa oo aan u wada istaagno midnimo, hal qalbi inaan wada lahaano, kana dambeeya ciidankayaga, booliiskayaga, iyo dhammaan hay'adaha kale ee qaranka, annagoo ka rajaynayna ajirka shahaadada xagga Alle (caza wa jalla) , wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَنْ سَأَلَ اللَّهَ الشَّهَادَةَ بِصِدْقٍ بَلَّغَهُ اللَّهُ مَنَازِلَ الشُّهَدَاءِ وَإِنْ مَاتَ عَلَى فِرَاشِهِ)**

**(Qofkii Alle shahaado si dhab ah u weyddiista wuxuu gaarsiinayaa darajada shuhadada xataa hadduu ku dhinto gogoshiisa).**

**Ilaahayo ilaali dalkeena Masar iyo dhammaan dalalka caalamka**